



Hadii midkiin soo galo masaajidka ha tukado labo rakcadood, intaanu fariisan

Abii Qataada Alsalami Allaha ka raali ahaadee wuxuu Rasuulka scw ka wariyey inuu yiri:
"Hadii midkiin soo galo masaajidka ha tukado labo rakcadood, intaanu fariisan".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Wuxuu ku booriyey Nabigu scw qofka soo gala masaajid waqtigay doontaba ha ahaatee iyo ujeedadu doonaba ha u soo galee, inuu tukado labo rakcadood, intaanu fariisan, waana labada rakcadood ee taxiyyatul masjidka.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65091>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

